# Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Ururka Macallimiinta Portland Waxay Heshiis Ku Gaareen in La Bilaabo Waxbarashadii Fasalada Lagu Qaadanayey

**Maarso 15, 2021**

Qoysaska iyo Asxaabta Qaaliga ah ee PPS,

Waxa aan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqo in Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Ururka Macallimiinta Portland ay gaareen heshiis dib loogu furiyo iskuulada PPS inay ardaydu waxbarashadii ay ku qaadanayeen fasalada, laga bilaabo ardaygeena ugu yar bisha Abriil 1deeda iyo 2deeda 2021. Fasalada labaad(2) ilaa fasalada shanaad (5) waxa ay waxbarashada bilaabi doonaan bisha Abriil 5naad, halka ay fasalada 6naad ilaa fasalad 12naad ay waxbarashada fasalada gudahooda lagu qaato ay bilaabayaan todobaadka Abriil 19keeda. Heshiiskani marka ay u codeeyaan xubnaha Ururka Macallimiinita Portlad (PAT) iyo xubnaha Golaha Waxbarashadu.

Heshiiskayagu wuxuu yimid ka dib markii bilooyin la soo qorshaynayey, diyaarinayey, iyo gorgortankii lala galnay Ururka Macallimiinta Portland (PAT) iyo hawlgalayaasha shaqaalaha. Wada hadalladani awgood, sidoo kale fikradaha iyo warcelintii muhiimka ahayd ee qoysaska, waxaan leenahay qorshe adag oo aan ardayda si ammaan ah ay ugu soo noqoneyso dugsiyada. Inta badan, ardayda da'da dugsiga hoose waxay iskuulada waxbarashadoodu fasalada ku qaadan doonaan todobaadkii afar maalmood, iyaga oo iman doona iskuulka subaxii ama galinka dambe si ay waxbarashada u qaataan; waxaa suurtagal ah in iskuulada qaarkood ay ka reeban yihiin moodhalkani iyada oo ay ku xiran tahay waxay waalidiintu doorbidaan marka ay isgarab dhigo waxbarashada fasalada lagu qaadanayo iyo tan ay ardaydu guryaha ku qaadanayaan.

PPS waxay dib u furi doonaan moodhalkani ay ardaydu fasalada imanayaan jadwalka soo socda:

- Fasallada Pre-K iyo Waxbarashada Bilowga ah (Head Start) waxay bilaabi doonaan inay fasalad ku qaataan bisha Abriil 1deeda, waxbarasho soconeyneyso 3 saacadood maalin walba (marka laga reebo maalinta Arbacada).
- Ardayda Fasalada Xannaanada Caruurta( K ) iyo  fasalka 1aad  waxay bilaabi doonaan midkood maalinta Khamiista, bisha Abriil 1deeda ama maalinta Jimcaha, Abriil 2deeda. Ardayda waxaa loo qaybin doonaa koox arday subaxii waxbarashada qaadata ama kuwa galinka dambe qaata maalin kasta (marka laga reebo maalinta Arbacada) iyadoo la sii wadi doono waxbarashadii dhammaan ardayda muusikada, farshaxanka, Ciyaaraha(P.E) iyo maktabadu ay guryaha ku qaadanayeen.
- Dhammaan ardayda dhigata fasallada 2aad ilaa 5aad ee doortay inay ka qaybgalaan nooc isku-dhafan ee iskuulada lagu qaato ay sidoo kale loo qaybin doonaa labo kooxood oo kala qaata waxbarashadii subaxii ama galabnimada, oo bilaabmi doona maalinta Isniinta,ee bisha  Abriil 5teeda.

Laga soo bilaabo bilawgii aafada xanuunka faafayey, waxaan go'aansanay inaan si adag ula jaanqaadno tilmaamaha caafimaadka bulshada waxaana raacnay talooyinka khubarada caafimaadka, oo ay ku jiraan [Golaha Tallo-bixinta Caafimaadka PPS](). Muddo bilooyin ah, waxaan qaadnay talaabooyinka lagama maarmaan ah si aan u bilowno sidii aan ugu soo dhaweyn lahayn iyaga oo nabad ah ardaydeena iyo shaqaalaheena dhismayaasha iskuulada sida ugu macquulsan. Tan iyo bishii Jannaayo, macallimiinteena iyo shaqaalaha kale ee ardayda wajahaya waxay fursad u heleen in la tallaalo ka dib markii guddoomiyuhu gobolku mudnaanta siiyay kooxahan - inay safka hore ka galaan marka la tallaalku noqdo mid a heli karo.

Waxa aan joognaa waqtigii ku haboonaa ee aan dib u furi lahayn iskuulkadeena.

Qorshaheena dib u furista waxaa ka mid ah waqti ay shaqaalaha iskuulka ay dib u eegis ku sameeyeen inay fahmaan hab maamuuska loo marayo iyo howlaha joogtada ah. Arrinka ugu muhiimsan ah ee dib-u-furidda dhismayaasha iskuulada waa kor u qaadista in la hagaajiyo tayada hawada, maadaama socodka hawada uu muhiim u tahay yareynta faafitaanka fayriska. Waxaan soo kormeeray khabiiro HVAC ah oo soo dhex mariyay dhismayaasha iskuulka oo dhan, iyada oo la sameeyey meelihii looga baahnaa in wax laga qabto dhinaca ee HVAC, sida hawo kordhin, iyo iyada oo fasalka kasta la keenay qalabka hawada nadiifiyo ee HEPA.

Waxaan u diyaarinay dhismayaasha dugsigeenna annaga oo ku rakibnay astaamo, meelo lagu kala qeybinayo si loo kala ilaaliyo, goobihii laga soo galayey dhismayaasha, iyo goobo gacmaha lagu nadiifiyo. Dugsiyadeenu waxay hirgeliyeen hab maamuusyo iyo dhaqammo fara badan oo ku lug leh kala fogaansho jireed, cabirka wadajirka ah si xumada ardayda loo fiiriyo, iyo cunno qaybin hab ku habboon COVID. Dugsi kastaa wuxuu yeelan doonaa Kalkaaliye Caafimaad oo joogo iskuulka. Intaa waxaa sii dheer, waxaan sii wadeynaa shaqaaleynta shaqaale dheeri ah oo ilaaliya si aan ugu kordhino ilaaliyey shaqaalaha nadaafada iskuulada ee muujiyey dadaalka badan si aan u hubino in dhismayaasheena ay noqdaan nadiif aad u fiican intii suurtagal ah.

Kooxaheennu waxay muujiyeen dadaal, feker iyo qorsheyn dhammaystiran dhinaca dib u furidda dugsiyadeenna. Kuma noqon doonno fasallo wax walba yihiin sidii ugu hagaagsaneyd, laakiin waxaan ku laaban doonnaa kuwa nabadglyo ah.

Qorshaheennu wuxuu si weyn u sharfayaa ballanqaadkeenna wadaagga ahaa ee xagga caafimaadka iyo badbaadada wuxuuna ilaaliyaa dabacsanaanta heerka dhismaha si aan si wanaagsan wax uga qabanno baahiyaha iyo waxyaabihii ay doorbideen bulshooyinka iskuuladu. Muhiimaduna waxa weeye, qorshaheenu wuxuu qoysaska u oggolaanayaa inay go'aan iyagu ka gaaraan haddii ay doorbidayaan carruurtoodu inay ku dhammaystiraan inta ka hadhay sannad-dugsiyeedka inay waxbarashadoodu ku qaataan iyaga oo guryahooda jooga ama inay waxbarashada isku dhafan ee iskuulada lagu qaadanayo qaataan.

Wax kasta oo qoysaska doortaan, carruurtoodu waxay sii wadi doonaan helitaanka waxbarasho tayo sare leh, caafimaadka maskaxda iyo taageerooyinka shucuurta bulshada, cunno nafaqo leh, helitaanka adeegyada ay bixiyaan wada-hawlgalayaasha bulshada, iyo sidoo kale iyaga oo fursadda u helaya inay kaga qaybgalaan ciyaaraha fudud iyo hawlaha farshaxanka ee lagu soo

bandhigayo xarumaha iskuuladeenii todobaadyadii la soo dhaafay.

Labo iyo tobankii (12) bilood ee la soo dhaafay waxa ay ahaayeen kuwa ina tijaabiyey. Waxaan hada gaarnay guul muhiim ah oo ku wajahan hadafka ugu dambeeya sidii aan si dhammeystiran dib ugu furi lahayn iskuuladeena. Ma aynaan soo gaarneyn halkani xilligan haddaan la helin hal-abuurnimada iyo u-hibeynta macallimiinteenna, shaqaalaha dugsiga, hoggaamiyeyaasha xafiisyada dugsiga iyo xarunta dhexe, qoysaska, iyo ardayda aan dhammaanteen u adeegno. Marka waan idiin mahadcelinayaan.

Waxaan heli doonaa faahfaahin fara badan oo dheeraad ah kuwaasi aan idinla wadaagno labada maalmood ee soo socda, maadaama qorshaha loo codeeyay faahfaahintana la soo gabogabeeyo. Intaas ka dib, waxaan rajaynayaa inaan idinla wadaago warkani xiisaha inaan ognahay inay waxbarashadii iskuulada lagu qaadanayey ay ka bilaabmeyso Dugsiyada Dadweynaha Portland wax ka yar saddex todobaad.



Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada